DEPARTMENT OF AGRICULTURE

# Deeqda Kaalmada Lacagta Hordhaca ee Minnesota

## Tilmaamaha Codsiga Deeqda Sannad-Maaliyadeedka 2027

**Codsiyada waa in la soo gudbiyaa ugu dambayn 11:59 fiidnimo, Agoosto 31, 2026.**

**July 6, 2026**

Iyadoo la raacayo Xeerka Dadka Naafada ah ee Maraykanka (Americans with Disabilities Act - ADA), macluumaadkan waxaa lagu heli karaa qaabab kale oo isgaarsiineed haddii la codsado, adigoo wacaya 651-201-6000. Dadka isticmaala TTY waxay wici karaan Adeegga Isgaarsiinta Minnesota Relay lambarka 711. Waaxda Beeraha ee Minnesota (MDA) waa loo-shaqeeye iyo bixiye adeeg oo bixiya fursado loo siman yahay.

# Tusmo


Tusmo ..... 2
Soo Koobidda Deeqda ..... 4
Guudmar ..... 4
Helitaanka maalgelinta ..... 4
U-qalmitaanka ..... 5
Codsadayaasha u qalma ..... 5
Iibsiyada u qalma ..... 6
Aan u qalmin ..... 7
Beeraha Magaalooyinka ..... 7
Lacagta Iswaafajinta ..... 9
Sida Loo Codsado iyo Jadwalka Deeqda ..... 10
Ku codso onleenka ..... 10
Ansixinta ka dib ..... 10
Sida loo soo gudbiyo su'aalaha ..... 12
Habka Dib-u-eegista Codsiga ..... 12
Habka dib-u-eegista iyo bixinta deeqda ..... 12
Iskahorimaadyada danaha ..... 13
Ogeysiiska asturnaanta iyo kala soocidda xogta ..... 13
Shuruudaha Codsadayaasha la Siiyay Deeqda ..... 16
Heshiiska deeqda iyo bixinta lacagta ..... 16
La-xisaabtanka iyo warbixinta ..... 16
Lacag-bixinnada ..... 17
Kormeerka ..... 18
Hantidhowrka iyo haynta diiwaannada ..... 18
Diiwaangelinta codbixiyaha ..... 19
Qiimeynta codsadayaasha la siiyay deeqda ..... 19

Xuquuqda Joojinta ........................................................................................................................ 20
Codsiga: Qeexitaannada iyo Su'aalaha ........................................................................................ 21
Qeexitaannada ............................................................................................................................ 21
Codsiga: Su'aalaha ...................................................................................................................... 22

# Soo Koobidda Deeqda

## Guudmar

Deeqda Kaalmada Lacagta Hordhaca ee Minnesota waxay siisaa ilaa $20,000 beeraleyda u qalma si ay ugu iibsadaan beertoodii ugu horreysay. Barnaamijka deeqda waxaa maamula Hay'adda Maaliyadda Miyiga (Rural Finance Authority - RFA) ee Waaxda Beeraha ee Minnesota (MDA), iyadoo qayb ka ah himilada RFA ee horumarinta khayraadka beeraha ee gobolka.

Ujeeddada barnaamijka deeqda waa in laga caawiyo beeraleyda inay maalgashadaan lahaanshaha beer. Maadaama celceliska da'da beeraleyda gobolkeenna uu sii kordhayo, qorsheynta wareejinta lahaanshaha beeraha iyo ilaalinta dhaxalka beeraha ayaa sii noqonaya kuwo muhiim u ah waaxda beeraha.

Barnaamijka waxaa lagu oggolaaday Minn. Stat. 17.133 41A.12, waxaana lagu maalgeliyey Laws of Minnesota, 2025, Kalfadhigii Caadiga ahaa, Cutubka 34, Qodobka 1, Qaybta 2, Farqad-hoosaadka 4(c). Macluumaad ku saabsan barnaamijka waxaa laga heli karaa bogga internetka ee [Down Payment Assistance Grant](). Codsiyada waa la aqbali doonaa ilaa 11:59 fiidnimo, Waqtiga Dhexe (Central Time - CT), Agoosto 31, 2026.

## Helitaanka maalgelinta

Sharci-dejinta Gobolka Minnesota waxay u qoondaysay $1.25 milyan sannad kasta barnaamijkan sannadaha maaliyadeedka (FY) 2026 iyo 2027 (kuwaas oo soconaya Luulyo 1 ilaa Juun 30). Haraaga aan la isticmaalin ee FY26 waxaa loo heli doonaa in lagu isticmaalo FY27.

MDA waxay ku bixin doontaa deeqahan hab bakhtiyaanasiib oo aan kala sooc lahayn (random lottery process), iyadoo mudnaan la siinayo codsadayaasha u qalma ee iibkooda guud ee wax-soo-saarka beeraha sannadkii aanu ka badnayn $100,000 iyo codsadayaasha u qalma ee soo saara hemp-ka warshadaha (industrial hemp), xashiishadda (cannabis), ama dalagyada gaarka ah (specialty crops). Shuruudaha u-qalmitaanka waxaa si faahfaahsan loogu sharaxay bogga xiga. Haddii aadan buuxin shuruudahan mudnaanta leh, weli waad codsan kartaa.

Waxaan filaynaa in waraaqaha lagu ogeysiinayo deeq bixinta la soo saaro inta u dhaxaysa Sebtembar 2026 iyo Maarso 2027 si loogu isticmaalo iibsashada beeraha dhici doonta ka dib Agoosto 31, 2026, iyo lix bilood gudahood laga bilaabo taariikhda deeqda la bixiyay. Dadka la siiyo deeqda waxay codsan karaan muddo kordhin haddii ay soo gudbiyaan heshiis iibsi oo ansax ah oo ku saabsan dhulka beerta ay doonayaan inay iibsadaan, ama haddii ay si firfircoon ula shaqeynayaan bixiye kaalmo farsamo (Technical Assistance - TA) oo ay ansixisay RFA, kaas oo xaqiijinaya in qofka deeqda la siiyay uu raadinayo dhul beereed isla markaana uu dhaqaale ahaan awood u leeyahay inuu iibsado. Liiska

bixiyeyaasha TA ee la ansixiyay iyo faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan muddada kordhinta waxaa laga heli karaa bogga 6 ee dukumeentigan. Muddada kordhinta mar walba suurtagal uma aha codsadayaasha ku jira liiska sugitaanka, iyadoo ku xiran helitaanka lacagaha hadhay ee loo wareejiyay sannadka xiga (rollover funds).

# U-qalmitaanka

## Codsadayaasha u qalma

**Codsadayaasha waa inay:**

- Yihiin shaqsi. Beeraha u dhisan LLC, iskaashi (partnership), urur aan macaash doon ahayn (nonprofit), ama noocyo kale oo ganacsi waa inay codsadaan oo ay dhulka ku iibsadaan magaca qof shaqsi ah. Amaahdu waxay ku jiri kartaa magaca ganacsiga haddii codsadaha ku qoran yahay dokumentiga lahaanshaha dhulka (deed). Codsadayaasha waxay soo gudbin karaan hal codsi oo keliya beer kasta/qoys kasta.
- Yihiin degane Gobolka Minnesota.
- Muujiyaan waayo-aragnimo ama aqoon ku filan oo ku saabsan nooca beerashada ay qorsheynayaan inay qabtaan, iyagoo ku caddeynaya mid ka mid ah kuwan::
    - Inay hore uga heleen ugu yaraan $1,000 dakhli beerasho,
    - Inay dhammaystireen barnaamij la ansixiyay oo Maareynta Ganacsiga Beeraha (Farm Business Management) ,
    - Inay haystaan shahaado laba sano ama afar sano ah oo la xiriirta cilmiga beeraha, ama
    - Inay leeyihiin ugu yaraan saddex sano oo waayo-aragnimo shaqo oo la xaqiijiyay oo maamulka beer ah oo laga soo shaqeeyay beer la mid ah.
- Ka helaan wax ka yar $250,000 iibka wax-soo-saarka beeraha sannadkii cashuuraha ee ugu dambeeyay.
- Codsadayaasha iyo xaasaskooda waa inaysan hore u lahayn lahaansho toos ah ama aan toos ahayn oo dhul beereed.
- Codsadayaasha waa inaysan qaraabo dhiig ama guur ahaan la ahayn milkiilaha dhulka beerta ee ay damacsan yihiin inay iibsadaan.
- Qabtaan inta badan shaqada jireed ee maalinlaha ah ee beerta.
- Qorsheeyaan inay lahaadaan dhulka beerta ugu yaraan shan sano. Codsadayaasha la siiyo deeqda ee aan sidaas yeelin waxay bixin doonaan ganaax uu u qaadayo Guddoomiyaha, kaas oo u dhigma 20% lacagta deeqda sannad kasta oo ay shuruuddani khusayso.
- Ku jiraan xaalad wanaagsan oo ay kula jiraan Gobolka Minnesota:
    - Aanay ku lahayn cashuuro dib u dhac ah.

    - Aanay ku lahayn wax dayn-bixin la'aan ah oo ku saabsan maalgelin ay taageerto Gobolka Minnesota toddobadii sano ee la soo dhaafay.
    - Ay muujiyeen waxqabad la aqbali karo oo ku saabsan deeqihii hore ee MDA.
    - U hoggaansamaan xeerarka gobolka ee hadda jir.
- Waa inaan lagu helin dambi heer gobol ama federaal ah oo la xiriira heshiis deeq oo uu bixiyay Gobolka Minnesota.

**Codsadayaasha mudnaanta leh:**

Waa siyaasadda Gobolka Minnesota in la xaqiijiyo caddaalad, saxnaan, sinnaan, iyo joogteyn marka la bixinayo deeqaha tartanka ku saleysan. Tan waxaa ka mid ah hirgelinta kala duwanaanshaha iyo ka-qaybgelinta loo siman yahay ee bixinta deeqaha.

Siyaasadda 08-02 ee Xafiiska Maareynta Deeqaha (OGM) ee Waaxda Maamulka Shuruudaha Qiimeynta ee Dib-u-eegista Deeqaha Tartanka ku Saleysan (PDF) waxay dejisaa filashada ah in barnaamijyada deeqaha ay si ula kac ah u muujiyaan sida deeqdu ugu adeegayso bulshooyin kala duwan, gaar ahaan bulshooyinka ay saameeyeen sinnaan la'aanta ama kala duwanaanshaha.

Marka lagu daro shuruudaha u-qalmitaanka ee ku qoran boggii hore, barnaamijkan deeqdu wuxuu mudnaan siinayaa codsadayaasha:

- Ka helay wax ka yar $100,000 iibka wax-soo-saarka beeraha sannadkii cashuuraha ee ugu dambeeyay, **ama**
- Soo saara hal ama in ka badan oo ka mid ah dalagyadan:
    - Dalagyada gaarka ah oo ay Waaxda Beeraha ee Maraykanku ku qeexday miro iyo khudaar, dhirta daawada, geedo yaryar iyo xawaash, dalagyada beeraha, dalagyada ubaxa, iyo dalagyada xanaanooyinka dhirta
    - Hemp-ka warshadaha
    - Xashiishadda

## Iibsiyada u qalma

**Iibsiyada beeraha waa inay:**

- Noqdaan iibsi hanti ma-guurto ah oo loo isticmaalo beeraha (dhul la beeri karo, aqalka dhirta lagu koriyo ee ganacsiga, xerada doofaarrada, iwm.).
- Ka dhacaan gudaha xuduudaha Gobolka Minnesota.
- Dahacaan **ka dib** Agoosto 31, 2026, islamarkaana aan ka badnayn lix bilood ka dib marka codsiga la ansixiyo, haddii aan la oggolaan muddo kordhin kama dambaystaas.

- Codsadayaasha la siiyo deeqda waxay codsan karaan muddo kordhin haddii ay haystaan heshiis iibsi oo ansax ah oo ku saabsan dhulka beeraha ay damacsan yihiin inay iibsadaan, ama haddii ay si firfircoon ula shaqeynayaan bixiye kaalmo farsamo oo ay ansixisay RFA, kaas oo xaqiijinaya in codsadaha la siiyay deeqda uu raadinayo dhul beereed isla markaana uu dhaqaale ahaan awood u leeyahay inuu iibsado. Liiska bixiyeyaasha kaalmo farsamo ee la ansixiyay iyo faahfaahin dheeraad ah waxaa laga heli karaa bogga 6 ee dukumeentigan. Muddada kordhinta mar walba suurtagal uma aha codsadayaasha ku jira liiska sugitaanka, iyadoo ku xiran helitaanka lacagaha hadhay ee loo wareejiyay sannadka xiga.
- **Wax cusub oo FY27**, haddii codsadaha marka hore lagu daro liiska sugitaanka oo uu iibsado beer ka hor inta aan codsigiisa laga soo saarin liiska sugitaanka lana ansixin, RFA waxay awood u yeelan kartaa inay bixiso lacag dib loogu celinayo haddii iibku dhacay ka dib taariikhda kama dambaysta ah ee codsiga oo ahayd Agoosto 31.

## Aan u qalmin

**Waxyaabaha aan u qalmin waxaa ka mid ah, balse kuma koobna:**

- Iibsiyada dhul beereedka ee la sameeyo ka hor Agoosto 31, 2026.
- Iibsiyada uu iibiyuhu yahay xubin qoys oo dhow la ah codsadaha la siiyay deeqda ama xaaska codsadaha la siiyay deeqda. Xubin qoys oo dhow waxaa loola jeedaa sida lagu qeexay qaybta 267(c)(4) ee Xeerka Dakhliga Gudaha (Internal Revenue Code), waxaana ka mid ah walaalaha, lammaanaha isqaba, waalidiinta, awoowayaasha iyo ayeeyooyinka, carruurta, iyo faracyada ama asal ahaan ka soo jeeda qoyska. Eedooyinka iyo adeerrada/abtiyaasha, abtiyaasha iyo adeerada carruurtooda, iyo ilma-adeerrada ama ilma-abtiyada looma tixgeliyo xubno qoys oo dhow.
- Iibsiyada loogu talagalay wax aan ahayn dhul beereed. Haddii iibsigaagu uu ku jiro guri ama horumarin kale oo aan beeraha la xiriirin, ugu yaraan qiimaha hantida marka guriga laga reebo waa inuu la ekaadaa qiimaha deeqda iyo tabarucaadda $8,000 ee codsadaha la siiyay deeqda. Lacagta deeqda waxaa loo isticmaali karaa oo keliya hantida ma-guurtada ah ee beeraha ee ku jirta iibka (dhul la beeri karo, maqsinnada, iyo dhismayaasha kaabaya).
- Iibsashada guri ku yaalla xaafad cufan oo magaalo ama hareeraheeda ah oo loogu talagalay degaan.

## Beeraha Magaalooyinka

Beeraha magaalooyinka waxaa dib loogu eegi doonaa kiis kasta si gaar ah si loo go'aamiyo in loo tixgelin karo dhul beereed u qalma deeqdan. Codsadayaasha doonaya inay iibsadaan dhul beereed ku yaalla magaalooyinka waxaa laga yaabaa in laga codsado inay bixiyaan caddeymo dheeraad ah, sida

shatiyo, qorshayaal ganacsi, maalgelinta dhismaha, qiimeyn hanti, ama dukumeentiyo kale oo khuseeya oo caddeynaya in hantidaas loo isticmaali karo beerasho. Deeqdan looma isticmaali karo in lagu iibsado guri ku yaalla xaafad cufan oo magaalo ama hareeraheeda ah oo loogu talagalay degaan.

# Lacagta Iswaafajinta

Deeqda Kaalmada Lacagta Hordhaca waxay u baahan tahay in deeq kasta lagu waafajiyo ugu yaraan $8,000 oo laga helo ilo kale oo maalgelin ah. Lacagta iswaafajinta waxay noqon kartaa lacag caddaan ah, amaah, heshiis iib oo qayb-qayb lagu bixiyo (contract for deed), deeqo kale, ama isku-dar kuwan iyo ilo kale oo maalgelin ah. Lacagta iswaafajinta khasab ma aha inay noqoto lacag uu bixiyo codsadaha.

Tani waxay ka dhigan tahay in si loo helo deeqda ugu badan ee ah $20,000, codsadayaasha waa inay bixiyaan ugu yaraan $8,000 oo ka timaadda ilo kale oo maalgelin ah oo loogu talagalay iibsiga. Haddii codsadayaasha ay bixiyaan wax ka yar $8,000, deeqda ugu badan ee la siin karo waxay la ekaan doontaa lacagta ay bixiyaan.

**Tusaalooyin**

| Qiimaha Iibsiga | Lacagta Codsadayaasha | Ilo Kale | Lacagta Deeqda |
|---|---|---|---|
| $405,000 | $5,000 | Amaah $380,000 | $20,000 |
| $30,000 | $0 | Heshiis iib oo qayb-qayb lagu bixiyo $10,000 | $20,000 |
| $15,000 | $2,500 | Deeq kale $5,000 | $7,500 |

Haddii la ansixiyo, codsadayaasha waa inay awoodaan inay bixiyaan dukumeentiyo caddaynaya (warqadda oggolaanshaha, qiyaasta amaahda, iwm.) ilaha kale ee maalgelinta iyo maalgelinta iibsiga.

# Sida Loo Codsado iyo Jadwalka Deeqda

Codsiyada waxay furmi doonaan Luulyo 6, 2026, waxayna xirmi doonaan 11:59 fiidnimo Agoosto 31, 2026. Deeqaha waxaa lagu bixin doonaa hab bakhtiyaanasiib oo aan kala sooc lahayn, iyadoo mudnaan la siinayo codsadayaasha u qalma ee iibkooda guud ee wax-soo-saarka beeraha sannadkii aanu ka badnayn $100,000 iyo codsadayaasha u qalma ee soo saara hemp-ka warshadaha, xashiishadda, ama dalagyada gaarka ah. Bakhtiyaanasiibka lagu dooranayo dadka la siinayo deeqaha ayaa la qaban doonaa horraanta Sebtembar. Waxaad dib u eegi kartaa su'aalaha codsiga ee ku yaalla bogga ugu dambeeya ee dukumeentigan.

## Ku codso onleenka

Si aad u codsato, waa inaad buuxisaa codsiga onleenka ah, kaas oo laga heli doono [bogga internetka ee Down Payment Assistance Grant ](mda.state.mn.us/downpayment) (mda.state.mn.us/downpayment). Looma baahna isdiiwaangelin hore ama akoon.

Waxaad heli doontaa iimayl xaqiijin ah ka dib marka aad soo gudbiso codsigaaga, waana inaad u haysataa diiwaankaaga. **MDA mas'uul kama aha dhibaatooyin farsamo ama nidaam oo sababa inaan la helin codsigaaga ama isgaarsiin kale oo la xiriirta deeqda.** Waa mas'uuliyadda codsadayaasha inay hubiyaan in MDA heshay codsigooda iyo inay la socdaan xaaladda codsigooda deeqda. **La xiriir MDA haddii aadan helin iimayl xaqiijin ah ka dib marka aad soo gudbiso codsigaaga.**

Waxaad codsan kartaa nuqul codsiga oo boosto laguugu soo diri karo adigoo wacaya 651-201-6316 ama iimayl u diraya [RFA.loans@state.mn.us](mailto:RFA.loans@state.mn.us). Si kastaba ha ahaatee, waxaan si adag kuugula talineynaa inaad ku codsato onleen si looga fogaado dib u dhacyada suurtagalka ah ee boostada iyo si aad u hesho diiwaan elektaroonig ah oo muujinaya gudbinta codsigaaga. Codsiyada boostada lagu soo diro waxaa loo tixgelin doonaa in la helay taariikhda shaambadda boostada lagu dhuftay. MDA mas'uul kama aha dib u dhacyada ka dhasha habka boostada.

## Ansixinta ka dib

Haddii codsadayaasha laga soo xusho bakhtiyaanasiibka lana ansixiyo deeqda **waa inay dhammaystiraan iibsiga beerahooda lix bilood gudahood laga bilaabo taariikhda ansixinta** ama ay codsadaan muddo kordhin oo laga yaabo in la oggolaado ama aan la oggolaan. MDA waxay bixin doontaa ansixinta hore bartamaha Sebtembar, waxaana laga yaabaa inay ansixiso codsadayaasha ku jira liiska sugitaanka wakhti kasta inta u dhaxaysa Sebtembar 2026 iyo Juun 2027 haddii dadka markii hore la siiyay deeqda ay ka noqdaan ama lumiyaan deeqdooda.

Codsadayaasha la siiyay deeqda waxay codsan karaan muddo kordhin oo kama dambaysta ah haddii codsadaha la siiyay deeqda uu saxiixay heshiis iibsi oo ansax ah oo ku saabsan dhulka beeraha uu

damacsan yahay inuu iibsado, ama uu si firfircoon ula shaqeynayo bixiye kaalmo farsamo oo ay ansixisay RFA. Codsadayaasha la siiyay deeqda waa inay muujiyaan xiriir joogto ah oo toddobaadle ah ugu yaraan hal bil ah oo ay la leeyihiin bixiyaha kaalmada farsamada, kaas oo xaqiijin kara in codsadaha la siiyay deeqda uu si firfircoon u raadinayo dhul beereed isla markaana uu dhaqaale ahaan awood u leeyahay inuu iibsado dhul beereed. Muddada kordhinta mar walba suurtagal uma aha codsadayaasha ku jira liiska sugitaanka, iyadoo ku xiran helitaanka lacagaha hadhay ee loo wareejiyay sannadka xiga. Bixiyeyaasha kaalmada farsamada ee ay ansixisay RFA waxaa ka mid ah:

- U-doodayaasha Beeraha ee MDA
- Macallimiinta barnaamijka Maareynta Ganacsiga Beeraha ee la ansixiyay
- Hagayaasha Helitaanka Dhulka Beeraha
- R Amaah-bixiyeyaasha ay ansixisay RFA

Ansixinta ka dib, MDA waxay u diri doontaa codsadayaasha la siiyay deeqda ogeysiis deeq-bixin oo ay ku qoran yihiin lacagta deeqda iyo tilmaamo dheeraad ah. MDA waxay u diri doontaa lacagta deeqda shirkadda maamusha wareejinta lahaanshaha (title company) si loogu hayo akoonka ammaanada (escrow) looguna isticmaalo iibsiga hantida beeraha.

Haddii la ansixiyo, codsadayaasha waa inay bixiyaan:

- Heshiiska iibsiga 30 maalmood gudahood ka hor taariikhda kama dambaysta ah ee wareejinta lahaanshaha (waxa la saxiixi karaa ka hor ama ka dib ansixinta codsiga).
- Warqadda oggolaanshaha, qiyaasta amaahda, ama caddayn kale oo muujinaysa in lacagta iibsiga la xaqiijiyay.
- Gudbintoodii ugu dambeysay ee cashuurta federaalka oo xaqiijinaysa iibkooda wax-soo-saarka beeraha.
- Waxyaabo dheeraad ah haddii loo baahdo si loo xaqiijiyo macaamilka iyo/ama u-qalmitaanka codsadayaasha.

Codsadayaasha la siiyay deeqda waxaa looga baahan doonaa inay ka qaybgalaan kulan wacyigelin oo onleen ah oo khasab ah ka dib marka ay helaan deeqdooda, si ay wax badan uga bartaan jadwalka iyo waxa laga filayo deeqdan. MDA waxay iimayl ahaan ugu soo diri doontaa faahfaahinta kulankaas ka dib marka deeqda la ansixiyo. **Muhiim: Haddii codsadayaasha la siiyay deeqda aysan soo gudbin dukumeentiyadan waqtiyada kama dambaysta ah ee la cayimay ama aysan ka qaybgelin kulanka khasabka ah** (ama aysan qabanqaabin waqti kale oo kulanka ah), **waxaa laga yaabaa inay waayaan deeqdooda.**

### Tusaalaha jadwalka

1. Codsadayaasha waxay bilaabaan habka codsiga amaahda ee bangiga ama Hay'adda Adeegga Beeraha (FSA), waxayna helaan dhul beereed ay doonayaan inay iibsadaan.

2. Codsadayaasha waxay codsadaan Deeqda Kaalmada Lacagta Hordhaca.
3. MDA waxay ansixisaa codsiga, codsadayaasha la siiyay deeqdana waxay helaan warqad ansixin ah oo shaqaynaysa muddo lix bilood ah.
4. Inta lagu jiro muddada lixda bilood ee ansixinta:
    a. Codsadayaasha waxay MDA u soo gudbiyaan nuqullo ka mid ah heshiiska iibsiga, oggolaanshaha amaahda, iyo Schedule F.
    b. Codsadayaasha waxay MDA la saxiixdaan heshiiska deeqda.
    c. MDA waxay lacagta ku bixisaa shirkadda maamusha wareejinta lahaanshaha (title company).
    d. Iibsiga dhulka beeraha waa la dhammaystira.
5. Codsadayaasha waxay MDA u soo diraan bayaanka xisaab-celinta iibka (sale settlement statement) saddex maalmood gudahood ka dib marka la dhammaystiro wareejinta lahaanshaha.

### Sida loo soo gudbiyo su'aalaha

Codsadayaasha waxay su'aalahooda ku soo gudbin karaan iimayl ahaan RFA.loans@state.mn.us ama waxay wici karaan 651-201-6316.

## Habka Dib-u-eegista Codsiga

### Habka dib-u-eegista iyo bixinta deeqda

MDA waxay dib u eegi doontaa dhammaan codsiyada dhammaystiran ee la soo gudbiyo inta u dhaxaysa Luulyo 6 iyo Agoosto 31, 2026, si loo go'aamiyo u-qalmitaankooda. Dhammaan codsiyada u qalma waxaa lagu dari doonaa bakhtiyaanasiib aan kala sooc lahayn si loo go'aamiyo sida ay isugu xigayaan bixinta deeqaha. Iyadoo aan loo eegin kala horreynta bakhtiyaanasiibka, mudnaanta waxaa la siin doonaa codsadayaasha u qalma ee iibkooda guud ee wax-soo-saarka beeraha sannadkii aanu ka badnayn $100,000 iyo codsadayaasha u qalma ee soo saara hemp-ka warshadaha, xashiishadda, ama dalagyada gaarka ah.

Haddii ay lacag deeqeed soo harto ka dib marka MDA ay deeqo siiso dhammaan codsadayaasha mudnaanta leh, MDA waxay siin doontaa deeqo inta ay lacagtu oggolaanayso codsadayaasha kale ee u qalma, iyadoo la raacayo kala horreyntii ay ku heleen bakhtiyaanasiibka. MDA waxay habraaca bakhtiyaanasiibka la diyaarisay la-taliyeyaal ka socda Bakhtiyaanasiibka Gobolka Minnesota. Habraacaas waxaa lagu daabacay dukumeenti gaar ah oo laga heli karo bogga internetka eeown Payment Assistance Grant .

Codsadayaasha waxaa lagu wargelin doonaa go'aannada deeq-bixinta ugu dambayn bartamaha Sebtembar.

## Iskahorimaadyada danaha

Siyaasadda deeqaha ee gobolka waxay u baahan tahay in la dejiyo tallaabooyin iyo habraacyo looga hortagayo iskahorimaadyada danaha ee shakhsiyaadka iyo ururrada, kuwaas oo khuseeya codsadayaasha iyo dib-u-eegayaasha labadaba (MINN. STAT.16B.98 (habka maareynta deeqaha) iyo Siyaasadda OGM 08-01: Iskahorimaadyada Danaha ee Deeqaha (PDF)).

Iskahorimaadyada danaha ee ururrada waxay dhacaan marka:

- Codsadaha la siiyay deeqda ama codsadayaasha aysan awoodin, ama ay suuragal tahay inaysan awoodin, inay MDA siiyaan kaalmo ama talo dhexdhexaad ah sababo la xiriira waajibaadyo ama daacadnimooyin iska soo horjeeda.
- Dhexdhexaadnimada codsadaha la siiyay deeqda ama codsadayaasha ee fulinta deeqda ay saameyso ama ay suuragal tahay inay saameyso waajibaadyo ama daacadnimooyin iska soo horjeeda.

Marka laga shakiyo, la shaaciyo, ama la ogaado inuu jiro iskahorimaad danaha ah, codsadayaasha ama codsadayaasha la siiyay deeqda waa la ogeysiin doonaa, waxaana la qaadi karaa tallaabooyin ay ka mid yihiin, balse aan ku koobnayn, dib-u-habeynta qorshaha shaqada ee deeqda, wax ka beddelka waajibaadka codsadaha la siiyay deeqda ee heshiiska deeqda si loo yareeyo iskahorimaadka danaha, codsashada in codsadayaasha deeqdu soo gudbiyaan qorshe lagu yareynayo iskahorimaadka danaha si MDA ay dib ugu eegto, in laga reebo u-qalmitaanka deeqda, ama joojinta heshiiska deeqda.

## Ogeysiiska asturnaanta iyo kala soocidda xogta

Macluumaadka uu bixiyo codsadayaasha waxaa loo isticmaali doonaa in lagu qiimeeyo u-qalmitaankooda helitaanka deeqda barnaamijkan. Go'aanka lagu codsanayo deeqdan waa ikhtiyaari, sharci ahaanna codsadayaasha lagama rabo inay bixiyaan mid ka mid ah macluumaadka la codsaday. Codsadayaasha way diidi karaan inay buuxiyaan codsigan iyada oo aanay ka dhalanayn wax cawaaqib sharci ah. Si kastaba ha ahaatee, codsiyada si buuxda loo dhammaystiray oo keliya ayaa loo tixgelin doonaa deeq; codsiyada aan dhammaystirnayn lama tixgelin doono.

Xogta lagu bixiyo codsigan waxaa marka hore, sida uu dhigayo Xeerka Hab-dhaqanka Xogta Dowladda Minnesota Government Data Practices Act loo kala saaraa xog gaar ah ama xog aan dadweyne ahayn, inkasta oo qayb ama dhammaan xogta ay guud ahaan noqon doonto xog dadweyne marxalado kala duwan oo habka codsiga ah, haddii aan xogta si kale loogu kala saarin sharciyada gobolka ama federaalka. Helitaanka xogta gaarka ah ama aan dadweynaha ahayn wuxuu ku kooban yahay dadka uu sharcigu u oggol yahay, oo ay ku jiraan, balse aan ku koobnayn, shaqaalaha MDA iyo

qandaraaslayaasha leh waajibaad shaqo oo ansax ah oo u baahan helitaanka xogta, dhinacyada uu codsadayaasha u oggolaaday, dhinacyada lagu magacaabay amar maxkamadeed oo ansax ah ama amar yeeris federaal ah, Minnesota Management and Budget, Waaxda Maamulka ee Minnesota, hanti-dhawraha gobolka, iyo hanti-dhawraha sharci-dejinta. Haddii loo baahdo, MDA waxay sidoo kale xogta la wadaagi kartaa hay'adaha fulinta sharciga ama Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud.

Sida uu dhigayo sharciga deeqaha ee Minnesota (MINN. STAT. 13.599):

- Magacyada iyo cinwaannada codsadayaasha deeqda, iyo lacagta deeqda ee la codsaday, waxay noqon doonaan xog dadweyne marka jawaabaha codsiyada la furo.
- Dhammaan xogta kale ee ku jirta jawaabaha soo jeedinta (marka laga reebo xogta si kale sharci loogu kala saaray, oo ay ku jirto macluumaadka sirta ganacsiga sida hoos lagu sharaxay) waxay noqon doontaa xog dadweyne marka habka qiimeynta la dhammaystiro.
- Dhammaan xogta ay MDA abuurto ama hayso oo qayb ka ah habka qiimeynta (marka laga reebo macluumaadka sirta ganacsiga) waxay noqon doontaa xog dadweyne marka habka qiimeynta la dhammaystiro.

Habraaca lagu codsanayo ilaalinta sirta ganacsiga:

- Macluumaadka sirta ganacsiga waxaa loo kala saaraa xog aan dadweyne ahayn. Si xog loogu aqoonsado inay tahay sir ganacsi, xogta laga hadlayaa waa inay MDA siiso qofka ay khusayso (taas oo ah, xogtu waa inay ku saabsan tahay codsadayaasha), isla markaana ay buuxisaa qeexitaanka sharci ee ku xusan sharciga (MINN. STAT. 13.37, subd. 1(b)). Si codsadayaasha u codsadaan ilaalinta sirta ganacsiga ee xogta lagu soo gudbiyay codsigan, codsadayaasha waa inay: 1) si cad u tilmaamaan qaacidada, habraaca, xog ururinta, barnaamijka, aaladda, habka, farsamada, ama geeddi-socodka gaarka ah ee ay rumeysan yihiin inuu yahay macluumaad sir ganacsi; 2) sharxaan dadaallada ay sameeyaan si ay u ilaaliyaan sir ahaanshaha xogta; iyo 3) si ku filan u caddeeyaan sida xogtu uga hesho qiime dhaqaale oo madax-bannaan sababta oo ah si guud looma yaqaan, isla markaana aysan dadka kale si fudud ugu heli karin habab sharci ah. Kaliya sheegashada in xogtu tahay sir ganacsi, keligeed kuma filna in xogtaas loo kala saaro xog aan dadweyne ahayn. Go'aaminta xogta buuxinaysa qeexitaanka sirta ganacsiga ugu dambayn waa mas'uuliyadda sharci ee MDA, mana dammaanad qaadi karto in xogta uu codsadayaasha u aqoonsaday sir ganacsi loo kala saari doono sidaas. Haddii MDA ay go'aamiso in xogtu aysan buuxin qeexitaanka sirta ganacsiga, xogtaas waxaa loo heli doonaa dadweynaha haddii aan codsadayaasha helin amar maxkamadeed oo si kale u dhigaya.

Dhammaan dadka, ganacsiyada, iyo shakhsiyaadka codsanaya deeqaha Gobolka Minnesota waa inay u hoggaansamaan sharciyada khuseeya. Sida uu dhigayo sharciga cinwaankiisu yahay Xaqa Iska-Jarista Deynta Right of Setoff (MINN. STAT. 270C.65, subd. 3), codsadayaasha la siiyay deeqda waxay oggolaanayaan in lambarkooda Sooshal Sekiyuuritiga, lambarka aqoonsiga cashuurta federaalka ee loo-shaqeeyaha, iyo/ama lambarka aqoonsiga cashuurta ee Minnesota, oo hore loogu bixiyay gobolka,

loo shaaciyo hay'adaha cashuuraha ee federaalka iyo gobolka, iyo shaqaalaha gobolka ee ku lug leh bixinta waajibaadyada maaliyadeed ee gobolka. Lambarradan aqoonsiga waxaa loo isticmaali karaa fulinta sharciyada cashuuraha ee federaalka iyo gobolka, taas oo keeni karta in codsadayaasha la siiyay deeqda laga rabo inay soo gudbiyaan canshuur-celinnada gobolka oo ay bixiyaan wixii cashuuro gobolka uga dhacay ee aan hore loo bixin, haddii ay jiraan.

# Shuruudaha Codsadayaasha la Siiyay Deeqda

## Heshiiska deeqda iyo bixinta lacagta

Codsade kasta oo la siiyo deeqda waa inuu si rasmi ah ula galaa MDA heshiis deeq. Heshiiska deeqdu wuxuu qeexi doonaa shuruudaha deeqda, oo ay ku jiraan sida mashruuca loo hirgelinayo. Tusaalooyinka heshiisyada deeqaha waxaa dib loogu eegi karaa [bogga internetka ee Khayraadka](). MDA waxay xaq u leedahay inay wax ka beddesho tusaalooyinkan.

Marka codsiga la ansixiyo, isla markaana ka hor inta aan wax kharash ah la gelin, codsadayaasha waxaa laga rabaa inay sameeyaan waxyaabaha soo socda:

- Saxiixaan heshiiska deeqda.
- Bixiyaan magaca, cinwaanka, iyo macluumaadka lagala xiriirayo shirkadda maamusha wareejinta lahaanshaha (title company).
- Soo gudbiyaan dukumeentiyada kale ee loo baahan yahay muddada kama dambaysta ah ee la cayimay.
- Akhriyaan oo saxiixaan heshiiska deeqda si ay u muujiyaan ujeeddadooda ah inay dhammaystiraan hawlaha la soo jeediyay. Ku guuldarreysiga saxiixa heshiiska 30 maalmood gudahood waxay keeni kartaa in deeqda lagala noqdo.
- Heshiiska wuxuu sidoo kale MDA u oggolaanayaa inay la socoto horumarka mashruuca. Heshiiskan waa in la saxiixaa 10 maalmood oo shaqo gudahood laga bilaabo taariikhda loo diro codsadaha la siiyay deeqda.

Heshiis deeq oo si buuxda loo dhaqan geliyay waa heshiis ay wada saxiixeen dhammaan dhinacyadu isla markaana gaaray taariikhdiisa bilaabashada, iyadoo la raacayo taariikhda dambeysa ee labadaas. Waa inaad u hoggaansantaa shuruudaha iyo heshiiska deeqda, waxaadna sharci ahaan mas'uul ka noqon doontaa hubinta in waajibaadka codsadaha la siiyay deeqda la fuliyo iyo in loo hoggaansamo dhammaan shuruudaha gobolka iyo federaalka ee khuseeya, oo ay ku jiraan caymiska magdhowga shaqaalaha, takoor la'aanta, asturnaanta xogta, u hoggaansanaanta miisaaniyadda, iyo soo gudbinta warbixinnada.

## La-xisaabtanka iyo warbixinta

Waa siyaasadda Gobolka Minnesota in lala socdo horumarka deeqaha gobolka iyadoo laga rabo codsadayaasha la siiyay deeqda inay soo gudbiyaan warbixinno horumar oo qoran ugu yaraan sannadkiiba hal mar ilaa dhammaan lacagta deeqda la isticmaalo iyo dhammaan shuruudaha ku xusan heshiiska deeqda la buuxiyo.

- Codsadayaasha la siiyay deeqda waxaa laga rabaa inay soo gudbiyaan bayaanka xisaab-celinta iibsiga dhulka beeraha saddex maalmood oo shaqo gudahood ka dib marka la dhammaystiro

wareejinta lahaanshaha. Waxaa laga yaabaa in sidoo kale laga codsado inay soo gudbiyaan dukumeentiyo dheeraad ah oo loogu talagalay ujeeddooyinka oggolaanshaha.

- Codsadayaasha la siiyay deeqda waxay oggolaanayaan in sannad kasta oo ayan lahayn ama aysan beeran dhulka muddada shanta sano ee xigta, ay bixin doonaan ganaax uu u qaadayo Guddoomiyaha, kaas oo u dhigma 20% lacagta deeqda.
- Codsadayaasha la siiyay deeqda waxaa laga rabaa inay sannad kasta buuxiyaan warbixino ku qoran foomam ay diyaarisay MDA muddada shanta sano ee xigta si ay nooga caawiyaan qiimeynta saameynta muddada dheer ee deeqda. Warbixinnadan, codsadayaasha la siiyay deeqda waa inay soo gudbiyaan Schedule F ee cashuur-celintooda dakhliga federaalka ama diiwaanno kale oo la xaqiijin karo si loo caddeeyo dakhliga beerahooda. Gudbinta cashuuraha waxaa lagu samayn karaa hubin (audit) si loo xaqiijiyo saxnaantooda. Codsadayaasha la siiyay deeqda waxaa sidoo kale laga rabaa inay ka jawaabaan codsiyada macluumaad dheeraad ah iyo booqashooyinka goobta ee aan hore loo sii qorsheyn muddo gaareysa shan sano ka dib dhammaadka muddada heshiiska deeqda.

Codsadayaasha waa inay ogaadaan waxyaabaha soo socda:

- MDA waxay xaq u leedahay inay wax ka beddesho shuruudaha warbixinta inta lagu jiro muddada deeqda.
- Ku guuldarreysiga in si joogto ah loo soo gudbiyo warbixinnada, looga jawaabo sahannada, ama si degdeg ah looga jawaabo codsiyada macluumaadka waxay saameyn ku yeelan kartaa awoodda codsadaha la siiyay deeqda ee helitaanka maalgelin mustaqbalka ka timaadda MDA ama hay'adaha kale ee gobolka.
- Macluumaadka lagu soo gudbiyo warbixin ama sahan kasta waxaa loo kala saari doonaa xog dadweyne. Haddii codsadayaasha la siiyay deeqda ay u arkaan in macluumaad ka mid ah warbixinta uu yahay sir ganacsi, waxay codsan karaan in macluumaadkaas sirta ganacsiga ah loo ilaaliyo si qarsoodi ah waana inay si gaar ah u calaamadeeyaan macluumaadkaas. MDA waxay ogeysiin doontaa codsadayaasha la siiyay deeqda haddii la helo codsi lagu dalbanayo xogta dadweynaha ee ku saabsan macluumaadka ay codsadayaasha ku andacoodeen inuu yahay xog la ilaaliyay.

## Lacag-bixinnada

MDA waxay lacagta deeqda u diri doontaa shirkadda maamusha wareejinta lahaanshaha (title company) si loogu hayo akoonka ammaanada (escrow) looguna isticmaalo iibsiga hantida beeraha ee codsadayaasha la siiyay deeqda. Dhammaan lacag-bixinnadu waa inay waafaqsanaadaan miisaaniyadda deeqda ee la ansixiyay. Lacagaha iswaafajinta waxaa looga baahan doonaa isla dukumeentiyada caddaynta kharashka ee looga baahan yahay kharashaadka kale.

Lacagta deeqda lama bixin doono haddii dukumeentiyada loo baahan yahay ay maqan yihiin, haddii aysan MDA si qoraal ah u siin codsadayaasha la siiyay deeqda muddo kordhin.

Lacagta deeqda waxaa loo isticmaali karaa in lagu bixiyo deymaha cashuuraha federaalka iyo gobolka ama waa la hayn karaa ilaa codsadayaasha la siiyay deeqda ay bixiyaan wixii deymo cashuureed ah ee lagu leeyahay (MINN. STAT. 270C.65, Subd. 3 iyo sharciyada kale ee khuseeya).

MDA waxay codsan kartaa in codsadayaasha la siiyay deeqda ee aan dhammaystirin mashruuca lagu sharaxay soo jeedintooda marka muddada fulintu dhammaato ay soo celiyaan wixii lacag deeq ah ee ay heleen.

## Kormeerka

MDA waxay kormeertaa codsadayaasha la siiyay deeqda si ay u hubiso in shaqadu ku socoto muddada loo cayimay, u ururiso xogta natiijooyinka, u go'aamiso in habraacyada maaliyadeed si sax ah oo habboon loo raacayo, iyo/ama u xaqiijiso iibsiyada lagu sameeyay lacagta deeqda. Codsadayaasha la siiyay deeqda waxaa laga yaabaa inay helaan booqashooyin kormeer ah iyadoo ku xiran go'aanka MDA. Booqashooyinka kormeerka badanaa waxaa lagu sameeyaa goobta mashruuca iyadoo qof ahaan loo tagayo, balse sidoo kale waxaa lagu samayn karaa taleefan ama shir muuqaal ah (video conference), mararka qaarkoodna waxaa loo yaqaan "kormeerka miiska" (desk audit), waxaana ku jiri kara dib-u-eegis iyo wadahadal ku saabsan macluumaadka maaliyadeed iyo kan barnaamijka.

## Hantidhowrka iyo haynta diiwaannada

Buugaagta, diiwaannada, dukumeentiyada, iyo habraacyada iyo dhaqannada xisaabaadka ee codsadayaasha la siiyay deeqda ama dhinac kale oo khuseeya deeqda ama macaamilka waxaa baaritaan ku samayn kara hay'adda bixisay deeqda iyo hantidhowraha sharci-dejinta ama hantidhowraha gobolka, sida ku habboon (MINN. STAT. 16B.98, subd. 8).

Codsadayaasha la siiyay deeqda ayaa mas'uul ka ah haynta dukumeentiyada iyo diiwaannada la xiriira deeqda. Shuruuddan waxay socon doontaa ugu yaraan lix sano laga bilaabo taariikhda uu dhammaanayo heshiiska deeqda; marka la helo lana ansixiyo dhammaan warbixinnada kama dambaysta ah; ama muddada loo baahan yahay si loo buuxiyo dhammaan shuruudaha gobolka iyo barnaamijka ee ku saabsan haynta diiwaannada, hadba ta ugu dambeysa.

Codsadayaasha la siiyay deeqda ayaa mas'uul ka ah haynta dukumeentiyada iyo diiwaannada la xiriira deeqahooda. Codsadayaasha la siiyay deeqda waa inay hayaan gal mashruuc oo ay ku jiraan nuqullada dhammaan qaansheegyada, rasiidhada, caddaymaha lacag-bixinta, codsiyada lacag-celinta, waraaqaha muhiimka ah ee ay isweydaarsadeen MDA, warbixinnada horumarka, iyo dukumeenti kasta oo kale oo la xiriira mashruuca. Marka ay codsadaan hay'adaha gobolka ama federaalka, codsadayaasha la siiyay

deeqda waa inay soo saaraan nuqul si cad loo akhrisan karo oo ka mid ah diiwaannada lagu keydiyay galka mashruucooda.

### Tallaabooyin wax-ku-ool ah iyo takoor la'aan

Codsadayaasha la siiyay deeqda waxay oggolaanayaan inaysan takoorin shaqaale ama codsade shaqo sabab la xiriirta isir, midabka maqaarka, caqiidada, diinta, waddanka uu asal ahaan ka soo jeedo, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, xaaladda guurka, xaaladda helitaanka kaalmada dadweynaha, xubinnimada ama ka-qaybgalka guddi maxalli ah, naafonimada, jihaynta galmada, xaaladda qoyska, ama da'da, marka ay khusayso jago uu shaqaalaha ama codsadaha shaqo u qalmo (MINN. STAT. 363A.02). Codsadayaasha la siiyay deeqda waxay sidoo kale oggolaanayaan inay qaadaan tallaabooyin wax-ku-ool ah oo lagu shaqaaleysiinayo, lagu horumarinayo shaqada, lagu kordhinayo xirfadaha, lagu tababarayo, laguna qorayo dadka laga tirada badan yahay, haweenka, iyo dadka naafada ah.

Codsadayaasha la siiyay deeqda waa inaysan takoorin shaqaale ama codsade shaqo sabab la xiriirta naafonimo jireed ama maskaxeed marka ay khusayso jago uu shaqaalaha ama codsadaha shaqo u qalmo. Codsadayaasha la siiyay deeqda waxay oggolaanayaan inay qaadaan tallaabooyin wax-ku-ool ah oo lagu shaqaaleysiinayo, lagu horumarinayo shaqada, iyo guud ahaan loola dhaqmo dadka naafada ah ee u qalma si aan takoor lahayn oo ku saleysan naafonimadooda jireed ama maskaxeed dhammaan habraacyada shaqaalaynta, sida shaqaalaysiinta, dallacaadda, hoos u dhigista ama wareejinta, qorista shaqaalaha, xayeysiinta shaqooyinka, fasax shaqo ama joojinta shaqada, heerarka mushaharka ama noocyada kale ee magdhowga, iyo xulashada tababarka, oo ay ku jirto tababarka shaqo(Minnesota Rules, part 5000.3500).

Codsadayaasha la siiyay deeqda waxay oggolaanayaan inay u hoggaansamaan xeerarka iyo amarada khuseeya ee ay soo saarto Waaxda Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota, kuwaas oo lagu soo saaray si waafaqsan Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota Human Rights Act.

### Diiwaangelinta codbixiyaha

Codsadayaasha la siiyay deeqda waxay siin doonaan shaqaalahooda adeegyada diiwaangelinta codbixinta (MINN. STAT. 201.162).

## Qiimeynta codsadayaasha la siiyay deeqda

Ka hor inta aan deeqda si rasmi ah loo soo afjarin, MDA waxay qiimeyn doontaa waxqabadka dhammaan codsadayaasha la siiyay deeqda. Qiimeyntu waxay ka koobnaan doontaa ujeeddada deeqda; lacagta la siiyay codsadayaasha la siiyay deeqda; macluumaad ku saabsan waqtiga ay ku fuliyeen shaqada, tayada shaqada, iyo guud ahaan waxqabadkooda ee buuxinta shuruudaha iyo ujeeddooyinka deeqda; haddii heshiiska deeqda la joojiyay; iyo wixii walaac ah ee la xiriira sida

codsadayaasha la siiyay deeqda u isticmaaleen lacagaha gobolka. Qiimeynta waxqabadka codsadayaasha la siiyay deeqda ee heshiisyada deeqaha ee ka badan $25,000 waa inay MDA u gudbisaa Waaxda Maamulka ee Minnesota (MINN.STAT. 16B.98, subd. 12). Qiimeynta waxaa loo tixgeliyaa xog dadweyne (MINN. STAT. 13.599).

## Xuquuqda Joojinta

Codsigan soo jeedinta (RFP) kuma waajibinayo MDA inay bixiso deeq. MDA waxay xaq u leedahay inay joojiso codsigan soo jeedinta haddii ay u aragto inay taasi dan ugu jirto barnaamijka, hay'adda, ama Gobolka Minnesota. Gobolku sidoo kale wuxuu xaq u leeyahay inuu kala xaajoodo wax ka beddelka codsiga ama inuu diido mid ama dhammaan codsiyada lagu soo gudbiyay codsigan soo jeedinta. Gobolku uma jeedo inuu bixiyo heshiis deeq oo ku saleysan oo keliya jawaab kasta oo laga bixiyo codsigan soo jeedinta, mana bixin doono kharashka macluumaadka la codsaday ama la helay.

# Codsiga: Qeexitaannada iyo Su'aalaha

## Qeexitaannada

**Degane Minnesota** waxaa loola jeedaa in codsadayaasha ay ka sameysteen hoygooda joogtada ah gudaha xuduudaha Gobolka Minnesota isla markaana aysan hadda ujeedkoodu ahayn inay uga guuraan gobolka.

**Xaalad wanaagsan** oo ay kula jiraan Gobolka Minnesota:

- • Aanay ku lahayn cashuuro dib u dhac ah.
- Aanay ku lahayn wax dayn-bixin la'aan ah oo ku saabsan maalgelin ay taageerto Gobolka Minnesota toddobadii sano ee la soo dhaafay.
- Ay muujiyeen waxqabad la aqbali karo oo ku saabsan deeqihii hore ee MDA.
- U hoggaansamaan xeerarka gobolka ee hadda jira.

**Lahaansho toos ah** waxaa loola jeedaa marka qofku si toos ah u leeyahay dhul beereed, uu saamile ka yahay hawlgal ay ku jirto lahaanshaha dhul beereed, ama uu yahay ka-faa'iideyste xuquuq nololeed oo ay ku jirto lahaanshaha dhul beereed**.**

**Lahaansho aan toos ahayn** waxaa loola jeedaa dano kasta ama dano la raadin karo oo ku saabsan dhul beereed.

**Qoys dhow** waxaa loola jeedaa sida lagu qeexay qaybta 267(c)(4) ee Xeerka Dakhliga Gudaha (Internal Revenue Code), waxaana ka mid ah walaalaha, lammaanaha isqaba, waalidiinta, awoowayaasha iyo ayeeyooyinka, carruurta, iyo faracyada ama awoowayaasha kale ee tooska ah. Eedooyinka iyo adeerrada/abtiyaasha, carruurta eedada, adeerka ama abtiga, iyo ilma-adeerrada ama ilma-abtiyada **looma** tixgeliyo xubno qoys oo dhow**.**

## Codsiga: Su'aalaha

**Macluumaadka codsadayaasha beeraleyda**

- Magaca codsadayaasha iyo magaca xaaska (haddii ay khuseyso)
    - Fiiro gaar ah: Lammaanaha isqaba waxay soo gudbin karaan hal codsi oo keli ah
- Cinwaanka boostada ee hadda
- Da'da marka codsiga la gudbinayo (ikhtiyaari)
- Fadlan calaamadee Haa ama Maya:
    - Ma tahay degane Gobolka Minnesota?
    - Ma damacsan tahay inaad dhul beereed u iibsato adigoo ah qof shaqsi ah ama lammaane is qaba? (LLC-yada, iskaashiyada, ururrada aan macaash doonka ahayn, shirkadaha, iyo noocyada kale ee ganacsiga uma qalmaan.)
    - Ma ku jirtaa xaalad wanaagsan oo aad kula jirto Gobolka Minnesota?
    - Dhulka beeraha ee aad damacsan tahay inaad iibsato ma ku yaallaa gudaha xuduudaha Gobolka Minnesota?
    - Ma bixin doontaa inta badan shaqada jireed iyo maamulka beerta aad damacsan tahay inaad iibsato?
    - Ma oggol tahay in sannad kasta oo aadan lahayn ama aadan beeran dhulka muddada shanta sano ee xigta, aad bixin doonto ganaax uu u qaadayo Guddoomiyaha oo u dhigma 20% lacagta deeqda?
    - Dakhligaaga guud ee iibka wax-soo-saarka beeraha sannadkii hore ma wuxuu ka yaraa $250,000?
    - Dakhligaaga guud ee iibka wax-soo-saarka beeraha sannadkii hore ma wuxuu ka yaraa $100,000?
    - Adiga ama xaaskaaga ma yeelateen lahaansho toos ah ama aan toos ahayn oo dhul beereed ama hanti kale oo beeraha la xiriirta (dhul la beeri karo, xerada doofaarrada, aqalka dhirta lagu koriyo ee ganacsiga, iwm.)?
    - Ma damacsan tahay inaad deeqdan ku iibsato dhul beereed uu leeyahay xubin qoys oo dhow ama xubin qoys oo dhow oo xaaskaaga ah?
    - Weligaa ma lagugu helay dambi la xiriira heshiis deeq oo gobol bixiyay?
- Si aad ugu qalanto deeqdan waa inaad muujisaa waayo-aragnimo ama aqoon ku filan oo ku saabsan nooca beerashada aad damacsan tahay inaad qabato. Fadlan ku lifaaq hal ama in ka badan oo ka mid ah dukumeentiyada soo socda si loo xaqiijiyo u-qalmitaankaaga:
    - Schedule F ee ugu dambeeyay ee cashuur-celintaada federaalka, kaas oo xaqiijinaya iibka wax-soo-saarka beeraha ee ka badan $1,000. Gudbinta cashuuraha waxaa lagu samayn karaa hubin (audit) si loo xaqiijiyo saxnaantooda. Diiwaanno kale oo dakhli oo la xaqiijin karo ayaa sidoo kale la aqbali karaa si loo caddeeyo iibkii hore. Fadlan la xiriir maamulaha barnaamijka haddii aad qabto su'aalo.

    - Shahaadada dhammaystirka ee [barnaamijka Maareynta Ganacsiga Beeraha ee la ansixiyay.]()
    - Diiwaanka waxbarashada ama shahaadada qalin-jabinta ee barnaamij laba sano ama afar sano ah oo la xiriira cilmiga beeraha.
    - Warqad kooban oo ay ku jiraan magaca, magaca beerta, cinwaanka beerta, iyo macluumaadka lagala xiriirayo milkiilaha beerta, kaas oo xaqiijin kara ugu yaraan saddex sano oo waayo-aragnimadaada maamulka beeraha ee beertiisa.
- Ma jiraan wax kale oo aad jeclaan lahayd inaad la wadaagto si aad u muujiso aqoontaada ku saabsan nooca beerashada aad damacsan tahay inaad ku qabato iibsigan beeraha?
- Waa kuwee dalagyada aad beerto ama aad damacsan tahay inaad beerto?
    - Shaciir
    - Digirta la cuno
    - Xashiishadda
    - Galleyda beeraha
    - Galleyda macaan
    - Cawska xoolaha
    - Hemp-ka warshadaha
    - Dhirta yaryar iyo xawaashka
    - Ubaxa
    - Miraha
    - Dhirta daawada
    - Dalagyada xanaanooyinka dhirta
    - Misir
    - Digirta sooyga
    - Dabocase sonkorta
    - Gabbaldayaha
    - Lawska geedaha
    - Qamadiga
    - Khudaarta
    - Kuwo kale (fadlan sheeg):
    - Ma beerto dalagyo
- Waa kuwee xoolaha aad dhaqato ama aad damacsan tahay inaad dhaqato?
    - Shinnida/malabka
    - Lo'da/waylaha
    - Lo'da caanaha
    - Riyaha
    - Doofaarrada
    - Digaagga/ukunta
    - Idaha

- Kuwo kale (fadlan sheeg):
- Ma dhaqdo xoolo

**Macluumaadka iibsiga**

- Haddii la heli karo, fadlan bixi macluumaadka soo socda ee ku saabsan dhulka beeraha aad iibsanayso.
  - Degmada
  - Tirada acre-yada
  - Qiimaha iibka
  - Magaca iibiyaha(iyaasha)
  - Taariikhda la qiyaasayo in la dhammaystiro wareejinta lahaanshaha
  - Cinwaanka ama Aqoonsiga Baakadka (Parcel ID)
- Haddii la heli karo, iibsigan dhulka beeraha ma ku jiraa guri ama horumarin kale oo aan beeraha la xiriirin?
- Fadlan sharax sida aad u qorshaynayso inaad u maalgeliso qaybta ka hartay qiimaha iibsiga ee aan deeqdani daboolayn. (Tusaale ahaan: magaca amaah-bixiyaha, kaydkaaga gaarka ah, heshiis iib oo qayb-qayb lagu bixiyo/maalgelinta iibiyaha.)